



Marka qof kale aad ka wakiil ahaan danihiisa u dhammaynayso:

## **Hagis ku saabsan sida loo buuxiyo foomka warqadda wakiilashada (valtakirjalomake)**

### **1 Maxaa wakiilashada loola jeedaa?**

Wakiilashada waxaa loola jeedaa, in aad qof kale siiso oggolaanshaha ku saabsan in uu wax ka qabto arrimahaaga Kela-da.

Haddii aad doonayso in qof kale uu ka wakiil ahaan kuu qabto hawlaha la xiriira gunnooyinkaaga Kela-da, waa inaad siisaa warqadda wakiilashada (Valtakirja).

**Ku qor qaybta 1-aad macluumaadka qofka bixinaaya warqadda wakiilashada.**

### **2 Qofkee ayaan siin karaa warqadda wakiilashada?**

Waxaad warqadda wakiilashada siin kartaa qofkii aad doonto, kaasoo buuxiyay da'da 18 sano.

Qofka ka wakiilka ah qofka kale ee danihiisa u dhammaynaaya, waxaa loogu yeeraa wakiil.

**Ku qor qaybta 2-aad macluumaadka qofka la wakiishay.**

### 3 Waa maxay arrimaha Kela-da ee qofka kale ee iga wakiilka ah uu wax ka qaban karo?

Adiga ayaa go'aan ka gaaraaya arrimaha uu qofka kale ee kaa wakiilka ah uu wax ka qaban karo. Waxaad siin kartaa oggolaanshaha la xiriira in uu wax ka qabto dhammaan arrimahaaga Kela-da, ama waxaad u oggolaan kartaa hal arrin ah oo kaliya.

Waxaa uu qofkaas tusaale ahaan dalbi karaa gunnooyinka kala duwan, wuxuu Kela-da ku soo wargelin karaa wixii isbeddel ah ee xaaladdaada ku dhacay, ama waxaa uu u soo gudbin karaa caddaymaha dheeraadka ah ee loo baahdo, oggolaanshaha iyo jawaabaha. Sidoo kale maadaama uu arrimahaaga wax ka qabanaayo, waxaa uu heli karaa macluumaadkaaga xogta qarsoon ah, sida macluumaadka ku saabsan gunnooyinkaaga, heerkaaga dhaqaalaha ama xaaladdaada caafimaad.

**Haddii aad doonaysid, in qofka wakiilka ah uu wax ka qabto hal arrin oo kaliya oo ku saabsan gunnooyinka, waxaad ku qortaa warqadda wakiilashada magaca gunnadaas, tusaale ahaan kaalmada guriga (asumistuki).**

### 4 Illaa iyo muddo intee le'eg ayay shaqaynaysaa warqadda wakiilashada?

Warqadda wakiilashada waxaa ay shaqaynaysaa illaa iyo muddo aan la cayimin, ama illaa iyo muddo la cayimay oo taariikh la isla ogyahay ah. Waqti kasta oo aad doonto ayaad wax ka beddeli kartaa muddada ay shaqaynaso warqadda wakiilashada, ama waad ka laaban kartaa warqadda oggolaanshaha ee aad bixisay. Adiga lagaama rabo inaad sheegto sababta aad uga laabatay warqadda oggolaanshaha. Waxaad Kela-da ku soo wargelisaa oo kaliya arrinka ku saabsan ka laabashada warqadda oggolaanshaha.

**Waxaad doorataa illaa iyo muddo aan cayinnayn (toisaiseksi) ama waxaad ku qortaa taariikhda caddaynaysa illaa iyo inta ay shaqaynaysa warqadda wakiilashada.**

### 5 Waa maxay sababta loo saxiixaayo, loona cusboonaysiinaayo warqadda wakiilashada?

Marka aad saxiixayso warqadda wakiilashada, waxaa arrinkaas uu xaqiijinayaa in aad adigu tahay qofka bixiyay wakiilashada.

**Saxiix warqadda wakiilashada, waxaadka ku qortaa taariikhda maalinka aad bixisay wakiilashada.**

### 6 Sidee ayaan warqadda wakiilashada ugu gudbin karaa Kela-da?

Adiga oo ah bixiyaha warqadda wakiilashada waxaad ku soo gudbin kartaa dhanka internetka, oo aad ka soo galayso bogga kuu gaarka ah ee Kela-da (Omakela), ama waxaad soo dhigi kartaa boostada, amaba haddii aad doonayso waxaad keeni kartaa goobta adeegga ee xafiska Kela-da (palvelupiste).

**Qofka la wakiishay waxaa uu warqadda oggolaanshaha keeni karaa goobta adeegga ee Kela-da amaba boostada ayuu ku soo diri karaa.**



Valtakirja – Etuusasioiden hoitaminen  
Kelassa VAL3

Fullmakt – Skötsel av förmånsärenden  
hos FPA VAL3r

Power of attorney – Handling of matters  
related to Kela benefits VAL-e



[www.kela.fi/lomakkeet](http://www.kela.fi/lomakkeet)

[www.fpa.fi/blanketter](http://www.fpa.fi/blanketter)

[www.kela.fi/forms](http://www.kela.fi/forms)